SANCASOOL

CODKA SANCASOOL–THE VOICE OF SANCASOOL

CODKA

CADADKA 2AAD ISSUE 2 | NOVEMBER 1, 2007 | KA SOO BAXA LASCANOD LABO JEER BISHII - SANCASOOL NEWSPAPER

Anagana sangihi qoofalaa sahalo noo dhaafye. Sitaacii farduhu wuxuu ku lumay salow colaadeede. Sayidkii dabeed sharaftu waa naga siloonayde. Suunaariduu fuuli jirey sebenno haybkaygu. Cidkalay ka sayn dhabanayaan saaka ma ogayne.

Bil badhle Madax banaan oo ku hadla codka, aragtida iyo ra'yiga Sool, Sanaag iyo Cayn

Sawirada Amiin Arts: Siyaasad aan Xad iyo Mabda' lahay

Inside this issue: Tusmada Cadadka

Sawirada Aamiin Arts Daroogada Qaadka	1
Kelmada Garaadada	1
Shaqada iyo Soomaalida Dab Dhaxamooday Maxaa Lagu Daaweeyaa	1
Afsoomaaliga iyo Dhaqankii hore ee Soom-	2
Xildhibaanada iyo Siyaasiyiinta SSC Dacaayad	3
Sirta Nolosha—Hadraawi Baro Dalkaaga Hooyo Taariikhda Hadraawi	3
Barashada Diinta Islaamka Murtida iyo Sugaanta SSC	4

DAROOGADA QAADKA

Waa maxay qaadku? Qaadku waa geed maanka dooriya oo caleemihiisa la calashado oo aan midho iyo ubax midna bixin. Qaadku waa daroogo sun ah oo ay ku jirto maadada la yidhaahdo Cathine. Maadadaas oo laga helo xashiishada magaceeda la yidhaahdo opium (oobiyam) oo ah nooca 2aad ee daroogada. Qaadku waa geed caafimaadka qofka u daran. Dhanka waxyeelada caqliga wuxuu u dhexeeyaa Kookeynta iyo Afyuunka. Dalka UK waxay baadheen qaadka waxyeeladiisa 1932dii, isla markaana waxaa u soo baxay inay aad u sarayso. Qaadku wuxuu keenaa hurdo la'aan, lafdhabar xanuun, waali, isla markaana waxaa ku jirta maado dheefshiidka waxyeesha oo la yidhaahdo tannins.

Qaadku wuxuu xambaaraa cudurada halista ah sida AIDSka, Tiibayda, isla markaana hadda waa la horumariyey oo dalalka ka ganacsada waxay dhirta qaadka ku talaalaan sun dheeraad ah si daroogadiisa loo siyaadiyo. Sidoo kale waxaa lagu soo akhriyaa sixir, isla markaana waa lagu kaajaa oo mijintii kasta hal laan baa dib loo jeediyaa. Dadka ka shaqeeya qaadka ee xidhxidha waxay inta la isku xidhayo ku qiyaastaan faraha lugaha dhexdooda, siday ugu xidhxidhayeen waxaa faraha lugaha ka da'a malax, weliba ka darane waxay musqusha ku galaan caga cadaan, markay musqusha ka soo baxaana waxay hore ka sii wataan hawsha xidhxidhista qaadka. Cadday waxaa la hayaa film.

Soomaaliya oo tirada dadkeeda lagu qiyaaso 8 milyan oo aan xukumaad rasmi ahi ka jirin waa dalka adduunka ugu isticmaalka badan Qaadka. Dhalinyarada Soomaaliyeed oo ay cabsida geliyeen dagaalada, isla markaana ku soo barbaaray qawaaniin la'aan, waxay yidhaahdaan qaadku waa boqorka dagaalka, qabyaalada iyo biqid la'aanta. Cilmibaadhis la sameeyey waxay sheegaysaa in boqolkiiba 75% ay raga qaangaadhka ah ee Soomaaliyeed isticmaalaan daroogada Qaadka. Magaalo kasta waxay leedahay fagaare loogu talogalay Qaadka, halkaas oo ay raggu gabran yihiin saacado badan iyagoo dhegeysanaya muusik aad u cod dheer, isla markaana calaashanaya caleenta cagaaran oo dheecaamaysa isla markaana calyadu ama candhuuftu ka da'ayso. Dadka qaadka cuna waxaa ilkahooda isku lingaxa ama ku dhega huuro adag oo aan laga fujin karin.

Isticmaalka khamrada iyo xashiishada waxaa badanaaba loo tixgeliyaa mid xaaraam ah, laakiin calashiga iyo ganacsiga Qaadka waxaa loo tix geliyaa arrin ciiro ama mugdi ku jiro iyadoo lagu banaysanayo in Qaadka la isticmaalo ama laga ganacsado. Sida labada hore xaaraam u yihiin baa Qaadkuna u yahay. Marka meelo badan laga fiiriyo qaadku isagaa ka waxyeelo badan.

Qaadku mamnuuc kama aha wadama badan oo ku yaal qaarada Afrika oo ka hooseeya Saxaraha, waxaana guud ahaan lagu isticmaalaa Afrikada Bari iyo qayb ka mid ah Bariga Dhexe, gaar ahaan Yemen. Qaadku wuxuu mamnuuc ka yahay dhawr dal oo Afrika ah, sida Tanzania iyo Eritrea, sidoo kale wuxuu mamnuuc ka yahay USA iyo Yurub.

Sannadkii 1980kii baa Ururka Caafimaadka Adduunka ee loo soo gaabiyo WHO wuxuu Qaadka u aqoonsaday daroogo aan qofku ka fuqi-karin ama iska deyn karayn. Xilligaas baa hogaamiyayaashii Geeska Afrika u ololeeyeen ka soo horjeedsiga Qaadka, iyagoo odhanayey isticmaalka badan ee Qaadku wuxuu dhaliyaa furriin badan, dumarka oo la garciyo, iyo shaqo lumin. Ragga isticmaala daroogada Qaadka waxay dayacaan qoysaskooda iyagoo lacag aad u farabadan iyo waqti ku bixinaya cunista Qaadka.

Qaadku wuxuu aad uga baxaa dalalka Soomaaliya la deriska ah ee Kenya iyo Itoobiya, halkaas oo beeraleydu bilaabeen inay xididada u siibaan dhirta bunka (Coffee), iyagoo booskaas ku beeraya caleenta cagaaran ee Qaadka. Markaas oo uu hoos u dhac ku yimi suuqa bunka sanadihii sagaashanaadka iyo labadii kun. Maanta dalka Kenya wuxuu dhooofiyaa Qaad lagu qiyaasay lacagtiisa $250 million sannadkiiba, kaas oo ka badan ama ka kor martay lacagta ay Kenya ka hesho caleenta Shaaha oo ah dalag ay lacag badani ka soo gasho dalka Kenya. Warkaas waxaa laga soo xigtey dawladda Kenya.

Maalin kasta waxaa labada garoon ee ugu weyn Nairobi ka duula koox (dersin) diyaarado ah oo sida jawaano uu ka buuxo Qaad una usii jeeda Soomaaliya. Lacagta Kenya ka hesho maalintii waxaa lagu qiyaasay $300,000 oo kun oo dollar. Warkaas waxaa sheegay Hey'adda Qaranka Kenya ee u ololeysa ka soo horjeesiga Daroogada Qaadka ee sida xun loo adeegsado.

Sida ganacsiga Tubaakada iyo Alkolada baa Qaadku u yahay ganacsi ay wadaan dad aad u xoog badan. Qabqablayaasha dagaalka ee Soomaaliya baa xukuma ganacsiga Qaadka, lacagaha ka soo galana waxay ku iibsadaan hub, taas oo u ogolaaneysa inay sii haystaan xukunka iyo kala qoqobnaanta shacabka Soomaaliyeed. Dhawr ka mid ah kooxaha waaweyn iyo maamulada ayaa waxa ay si toos ah saami ugu leeyihiin ganacsiga Qaadka. Warkaas waxaa laga soo xigtey warbixin ay Soomaaliya ka soo saareen koox khubaro ah oo Qaramada Midoobey ah sannadkii 2006.

Boqolaal qorshoo wada qabyo ah Qaadow adigaa leh.
Qoryo raamso quudkana yaree Qaadow adigaa leh.
Qoys dumiye qayliyo huruuf Qaadow adigaa leh.
Qalbi qooqan qoodho aan wax tarin Qaadow adigaa lih.
Qardareeye kaadida qulquli Qaadow adigaa leh.
Tafo qaawan dumar wada khariban Qaadow adigaa leh.

Dab Dhaxamooday Maxaa Lagu Daaweeyaa?

Maanta iyo xaalada Lascanod ku sugan tahay maxaa baday inay sidaas u luuf-luufto? Sidaad og tihiin Lascanod waxaa soo food saaray xaalad adag oo keentay amni xumo, ganacsi xumo, caafimaad xumo, iyo waxbarasha la'aan. Dhibaatooyinkaasi kama imaan meel kale balse waxay ka yimaadeen shakhsiyaad bulshada ka mid ah ku nool gobolka Sool. Allah wuxuu Qur'aankiisa ku yidhi iska ilaaliya dhibaatada aan ku ekaanayn kii sameeyeey oo keliya, laakiin idin wada gaadhaysa. Sidoo kale ummaddu waxay wada saaran tahay doon keliya oo labo dabaq ah oo maraysa badweyn. Dulucda hadalku waxay tahay beeshu guul ku gaadhimayso isir xusuusin iyo qabyaalad. Guushuna waxay ku jirtaa gacanta Allah. Sidoo kale waxay guushu ku jirtaa beesha oo tala midaysan yeelata. Anigu waxaan qabaa doorka maqan ee maanta keenay dibtan iyo khalkhalka inay yihiin isimada beesha oo masuuliyadoodii soo taabatay sagxada. Isla markaana la ogaaday inaan talo ka go'in.Ummaddii ay masuulka ahaayeen lama yaqaan cid hogaaminaysa. Iyadoo ay sidaas - Eeg bogga 4aad

Shaqada iyo Soomaalida—Axadkii Kaslaanihi Faqiir Abidki Weeyaane

Dadka Soomaalidu waxay ku caan baxeen meel kasta oo ay aduunyada kaga noolyihiin caajisnimo ama kaslaanimo, in kastoo gobolada Soomaalidu dhammaan ka siman yihiin caajisnimada, laakiin waxaa la ogaaday markii dibedaha iyo dalalka shisheeyaha la tegey in dadka ka yimi gobolada koonfureed ka shaqo badan yihiin dadka ka yimi gobolada waqooyi ee Soomaaliya. Sidoo kale waxaa la ogaaday in gobolada koonfureed ay ku yar tahay deeqsinimada iyo is taakulaynta. Dadka koonfurtu way shaqaystaan laakiin wax badan isma taraan. Markaad England tagto waxaa ku cajab gelinay sida shacabka koonfureed u shaqaysanayaan. Sidoo kale waxaad ka naxaysaa sida dadka waqooyigu u tuban yihiin xarumaha qaadka iyo Southhall City. Arrintaasi waxay keentay in reer waqooyigu mar kasta ka faqiirsanaadaan shacabka koonfurta. Arrinta ugu weyn ee sababtay in reer waqooyiga laga shaqo badan yahay waa caajisnimo, isku day la'aan iyo xirfad la'aan. Dadka u dhashay gobolada waqooyigu waxay isku dayaan inay helaan shaqo heer sare ah iyagoo aan aqoon iyo xirfadtoona lahayn taasina waxay sababtaa inay la qabsanwaayaan dalka ay tageen oo shaqo waayaan, laakiin reer koonfureedku waxay aqbalaan shaqo kasta. Waayan dambe dadka shaqaysta waxay u badan yihiin dumarka iyo raga wuxuun xirfad ah leh, laakiin inta kale waxay hoganaysaa suuqyada qaadka. Haddaad doonaysid inaad shaqo hesho marka hore xirfad aad ku shaqaysato kasbo, ka bacdi raadi shaqo. Gobolada SSC way ugu daran yihiin xaga ma shaqaystanimada, inta badan waxaad arkaysaa wiil dhalinyaro ah ama gabadh oo aan weligood school iyo shaqatoona u jarmaadin. Kaba sii darane qofkaasi ma oga in wax ka maqan yihiin. Dadka noocaas ah waxaa ugu badan dhalinyarada baadiyaha ka timi oo sida tooska ah ula qabsaday TViga iyo cayaaraha, kuwaas oo biil dibadeed qaata. Dhalinyarada noocaas ahi macalimkoodu waa TViga, waxbarashada way ku jiradaan, jahligooda way qarsadaan iyagoo ka baqaya in la ogaado si aan loo dacaayadayn, isla markaana waxay ku qanacsan yihiin xaalada nololeed ee ay ku sugan yihiin. Sidoo kale waxay isu haystaan inay cid kasta ka fiican yihiin iyagoo ku qanacsan xaalada nololeed ee ay ku sugan yihiin. Bal fiiri biil bay qaataan oo waa tuugsadaan, xirfad ma leh oo waa ma shaqaystayaal, waxbarashada waa ku xajiimoodaan, dhaqan ma len oo taariikh ummaddeed waxba kama oga, macalimkoodu waa TViga, Afsoomaaliga ku hadalkiisa ma yaqaaniin, waxba ma qoraan, isla markaana dad bay isula fiican yihiin. Haddaad kula talisid inay shaqaystaan oo wax bartaan waxay kuu arkayaan inaad cadawgooda 1aad tahay oo aad biilkoodii ay tuugsan jireen duulaan ku tahay. Dhalinyaradaasi waxay jecel yihiin inay xarragoodaan xili kasta oo ay helaan nolol dhamaystiran. Dadka dibadaha waxaanu u sheegaynaa in lacagtiinu dalka dhibaato ku hayso, biil qaadashadu waxay curyaamisay dadkii inay shaqo tagaan. Talo gelyo ahaan biilasha ha la joojiyo ilaa qof waayeel ah oo cad ah mooyee. Waxaan kale oo dadka dibadaha u sheegaynaa in dadka dhalinyarada ah ee aad biilka siisaan yihiin kuwa ugu waxbarasho liita oo waxbarashada waa ku xajiimoodaa. Xaaji Aadam Afqalooc wuxuu yidhi: Axadkii kaslaan ihi faqiir abidki weeyaane, waxaa soo diyaariyey: Abdirizak Mohamoud Hussein.

Lascanod

beeluhu way na doorteen, laakiin nama dhegaystaan oo talada iyagaa qarqoorta.

Garaad Cabdullahi wuxuu dadkiisa mandaqada SSC u soo jeedinaya inay midoobaan oo mideeyaan fikircooda, cududooda, islana meel dhigaan khilaafka ku dhex jira, ka tashadaan mustaqbalkooda. Ugu dambayn waxaan ugu baaqayaa midnimo.

Garaad Cabdullaahi wuxuu hey'adaha iyo dadka muxsiniinta ah u soo jeedinayaa inay u gargaaraan dadka ka qaxay Lascanod ee ku tabaalaysan magaalooyinka, tuulooyinka iyo kaamamka mandaqada SSC. Gaar ahaan waxay dhibtu ku sii badan tahay wixii laamiga ka hooseeya.

Garaad Cabdullahi waxaa kale oo la weydiiyey doorka dhalinyarada SSC iyo waxaad kula talin lahayd. Garaad Cabdullaahi Maxammed Guuleed wuxuu ku jawaabay isagoo amaanaya: dhalinyarada SSC waxaan u soo jeedinayaa isla markaana u sheegayaa in mustaq bal xun oo madow soo foodsaaray loona baahan yahay in duruufaha laga midoobo oo dhabar adag iyo dulqaad badan loo yeesho. Sidoo kale haddaad dhalinyarada tihiin waxaad ogaataan in mandaqadeenu ka dambayso gobolada kale sidaas darteed loo baahan yahay sidaad uga qaybqaadan lahaydeen horumarkeeda, iyo kobcinta dhaqaalaha mandaqada. Mandaqada SSC waxay ku dambaysaa xaga hey'adaha caawimada, waxbarashada, iskuulada iyo jaamacadaha. Garaadku wuxuu dhalinyarada ku boorinayaa inay aad ugu dadaalaan soo noolaynta ururo dadka caawinaya, si ay u gacan qabtaan shacabkooda tabaalaysan, isla markaana horumar u gaadhsiisaan shacabka oo asaagiin u hiigsataan. Dhalinyarada waxaan kula talinayaa inay iska ilaaliyaan kala raacsanaanta maamulada, dhalinyarada waxaa looga baahan yahay inay ka fekeraan danaha mandaqada SSC oo aan cidna ku tiirsanayan. Halkan kala soco bil kasta labo jeer waraysiyo taxane ah oo aanu ka soo qaadidoono garaadada Mandaqada SSC. Waxaa soo diyaariyey Cabdirizak Mohamuod Hussein.

Kelmada Garaadada ee Bisha November

Bogga kelmada garaadada ee horaanta bisha November waxaan ku soo qaadanaynaa Garaad Cabdullaahi Maxamed Guuleed eeg sawirka.

Garaad Cabdullaahi wuxuu ka waramayaa xaalada guud ee shacabka SSC. Garaadku wuxuu yidhi: Shacabka Sool, Sanaag iyo Cayn waxaa soo food saaray xaaladii ugu xumayd ilaa 1991dii. Gaar ahaan Mandaqada Sool waxaa ka dhacay qax balaadhan oo aan ilaa Daraawiish ka dhicin mandada SSC, iyo burbur dhaqaale oo weyn. Intaas waxaa u dheer iyadoo mustaqbalka aan la saadaalin karin oo uu mugdiku jiro. Allaha awooda leh waxaan ka baryaynaa inuu naga qaboojiyo.

Garaad Cabdullaahi wuxuu xusay dhibaatada ku dhacday dadkii ka qaxay magaalada Lascanod, iyo siday u adag tahay in cidi wax u qabato. Sababaha ay u adag tahay in dadkaas wax loo qabto wuxuu Garaadku ku sifeeyey inay tahay iyagoo u qaxay dhul ballaadhan oo aan tirokoob lagu gaadhi Karin sida dhamaan degmooyinka, tuulooyinka iyo Kaamamka mandaqada SSC, iyo weliba mandaqadaha dibeda sida Garoowe, Burco, Boosaaso, Hargeysa, Gaalkacayo, Kenya iyo Itoobiya. Arrinta 2aad ee sababtay inaan dadka qaxay la caawin karin waxay tahay iyadoo mandaqada SSC aanay markii horaba joogin hey'ado markii dhibtu dhacday dabagala. Dhibaatada ugu weyn ee dadka qaxay waxay ku dhacday maatada iyo dadkii danyarta ahaa ee magaalada Lascanod.

Mar la weydiiyey sidee Garaad dhibtan wax looga qaban karaa? Garaad Cabdullaahi wuxuu yiri: Marka 1aad in Sool la qabsado ama maamulo ku hardamaan waxaa keenay khilaaf ku dhex jira dadka reer SSC, sidaas darteed waxaa dhibkan lagu xalin karaa in Somaliland ciidankeeda dib ula baxdo Puntlandna hadday markii hore difaacan kariweyday in aanay dagaal dambe soo celin. Xalkana ha loo daayo dadka mandaqada SSC inay iyagu tashadaan. Iyagu hadday dhan isu raacayaan oo ku biirayaan cid kale iyo hadday gaar isu taagayaanba ha ka soo tashadeen. Soomaalilandna waxaan talo ku siinaya inaanay xal noqonayn in dadka codkooda ama aragtidooda la cabudhiyo, aduunka way dhacdaa in xoog la isku qabsado, laakiin in xoog lagu haysto ama la cabudhiyo xal maaha guula laguma gaadho. Sidaas darteed Soomaaliland waa inay ka shaqaysaa wada tashiga dadka iyo inay codkooda u xor yihiin.

Wargeyska Sancasool wuxuu weydiiyey Garaad Cabdullahi maxay isimada mandaqada u dhashay uga aamusan yihiin dhibaatada haysata dadkooda? Garaad Cabdullaahi wuxuu ku jawaabey: Khilaafka isimada, wada tashi la'aanta isimada, is qadarin la'aanta isimada, gudoon jilicsanaanta isimada waxa keenay in la qabsado gobolka Sool. Isimadu waxay ka dhasheen beelo oo ay matalaan, haddii dad ka yar 10 qof meel fadhiistaan go'aan gaadhaan waxba kama bedeli karaan. Sidaas darteed

Adiguba cod buuxiyo xornimo caalamka u sheego

Xaaladaan wax ka duwan cidii u wada shacabka ha badbaasiyo. Shacabow ka fekera xal lagu badbaadayo.

Phone: 00 252 2 754737
Phone: 00 252 741 4067
e-mail: ilayseduservices@yahoo.com
www.ilayssocial.com

Fadlan haddaad hayso maqaal ama war nagala soo xidhiidh emailka kore ama telephone: 4490522 ama 4498922. Wargeyska Sancasool wuxuu soo baxaa 1da iyo 15ka bil kasta. Waxaad ka heli kartaa arround the world.

Xildhibaanada iyo Siyaasiyiinta SSC ee Puntland iyo Soomaaliland

waqti ka mid ah xiligii Puntland haysatey Lascanod waxaa shiray qaar ka mid ah odayaasha magaalada, ganacsatada, culumada iyo tiro badan oo isugu jira xildhibaano iyo rag jagooyin sare ka hayey Puntland. Nin odayaasha magaalada ka mid ah baa sawir fiican ka bixiyey xaalada xildhibaanada iyo masuuliyiinta mandaqada SSC. Ninkaasi wuxuu yiri: Waxay magaalada yimaadaan maalinta Khamiista iyagoo waraaqo fadlan ah sita oo lagu qaybsado cashuurta caanaleyda, hiliblaha iyo ganacsatada masaakiinta ah laga soo ururiyo. Markay lacagta fadlanta soo qaataan waxay u fadhiistaan qaad iyo qubxi, markaas baa la weydiiya, bal ka warama dawladii iyo maamulkii ummadda? Deeto waxay ku jawaabaan war meeshaasi meel maaha, waa meel Majeerteen u tashaday, meel boos inooka banaan yahayna maaha, waxba nalama weydiiyo, mushahar nalama siiyo oo dhawr bilood maanu arag, war niman gun ah baynu hoos galay, meeshaas waxba inooma yaalaan ee tashada.

Galabta jimcaha bay caraabaan markay fadlantii xoolaha masaakiinta ka hiraabteen. Garoowe markay tagaan baa la weydiiyaa, bal Lascanod ka warama? War meeshu meel maaha, waa meel aan cashuurta la bixinayn, waa meel reero isku haystaan, aano baanu ka baqnaa in naloo dilo, meesha niman Itixaad la yiraahdo baa iska haysta.

Dhibaatooyinka mandaqada SSC haysata waxaa abuura dadka hogaanka u haya. Dhibaatooyinka ay ku hayaan waxaa ka mid ah cashuurta dadka laga qaado waxba looguma qabto, gebi ahaana waxay ku baxdaa fadlan oo waxay jeebka ugu dhacdaa qofaan u dhididin. Sidoo kale waa wada rufyaaniin oo waxay mandaqada ka gudbiyaan warar aan sal iyo raad lahayn. Wararkaas oo magac xun u soo jiiday mandaqada, isla markaana dhaawac u geystay imaatinka hey'adaha ajinebiga. Wararkaas waxay ku bedeshaan xoogaa sandareero ah oo aan u dhigmin inta ay ka heli lahaayeen haddii ay dhulkooda horumarin lahaayeen.

Dhibaatada kale ee siyaasiyiinta iyo xildhibaanada reer SSC ku hayaan shacabkooda waxaa ka mid ah, inay shacabka u kala jejebiyaan reer reer iyo raas raas iska soo horjeeda iyagoo u kala xulufaysanaya danahooda gaarka ah. Nimankaasi waxay dhigi kariwaayeen siyaasad dadkoo dhan dhex uga wada dhigaysa si ay u maamushaan. Dhibaatada 3aad ee ay shacabka ku hayaan waxaa ka mid ah inay shacabka ka lumiyeen dantii guud oo ay ummadda u adeegsadeen inay danahooda gaarka ah ku gaadhaan. Mid kastaa wuxuu ka fekerayaa siduu maalka dadka dhowr guri iyo gawaadhi uga gadan lahaa shacabkana ku sanduleeyo inay dantiisa gaarka ah u adeegaan oo reer reer isugu diro. Garanay in maalka dadka la cuno, laakiin aakhiro tirada ma lagu daray iyo cawaaqibka xaaraanta.

shacabka SSC wuxuu maamulka Soomaaliland ka codsanayaa in wax weyn laga bedelo dadka mandaqada loo soo dirayo, waayo markii daraasaad rasmi ah la sameeyey waxaa soo baxay in Soomaaliland wadato dad ka madhan aqoon. War rasmi ah oo lagu kalsoon yahayna wuxuu sheegayaa in boqolkiiba 96 dadka metela shacabka SSC laga bilaabo xildhibaan ilaa maamule xafiis hoose aanay soo marin dugsi dhexe. Dadka Soomaaliland wadato qaar waxay ahaan jireen jiri askar galay, qaar waxay ahaan jireen qaadwalayaal, qaar waxay ahaan jireen alaalax, qaar waxay ahaan jireen dad liito aan talo la weydiin, qaar waxay ahaan jireen xoolo dhaqato, qaar waxay ahaan jireen darawalo. Dadka noocaas ah oo aqoon ka madhan waxba ma hogaamin karaan. Horay baa dhibaatadan oo kale shacabka SSC uga cawday Puntland, waxba waa laga qabanwaayey oo shacabka waa lagu dhega adaygay. Taasi waxay sababtay in Puntland 2 baroon ku qabsato Lascanod, iyadoo 200 tiknika wadatana ka huleesho. Codsigaas ka yimi waxgaradka waa in si gaar ah loo fiiriyaa. Haddii kale waxay arrintu ku dambaynaysaa meeshii kuwii hore mareen. Haddii xukuumada Soomaaliland hore ugu cabanaysey dad aanu xulano maanu hayn, hadda qabsate dhulkii ee xusha.

Telesom

The Reliable Choice

TELESOM Connecting People: Calls to anyone, anytime for just 1 cent per minute—very cheap SIM Card—Free line rental installation. Shirkad Casri ah kugu xidhaysa adduunka daafihiisa, meel kasta oo aad joogto, waqti kasta iyo cid kasta oo aad doonayso inaad ku xidhanto. Habeen iyo maalinba waxaanu u taaganahay adeegaaga.

AfKA SOOMAALIGA IYO DHAQANKII HORE EE SOOMAALIDA

Afartankii sanno ee ugu dambeysey waxaa dadka Soomaaliyeed ku dhacay dhaqan burbur laxaad leh, iyo afkii Soomaaliga oo qarka u saaran inuu tirtirmo. Arrimaha sababay dhibaatooyinkaas waa badan yihiin; laakiin waxaan xusaynaa saddexda arrimood oo ugu muhiimsan oo kala ah: Hoggaan xumo ummadda Soomaaliyeed ku dhacday, cadaadis shisheeye, iyo jahliga ummadda. Sidoo kale waxaa xaaladda sii adkeeyey dagaalkii sokeeye ee dalkeena ka dhacay 1990 ilaa hadda. Dagaalkaasi wuxuu galaaftay wixii aynu hanti lahayn, isla markaana wuxuu reebay burbur dadnimo oo ku dhacay dadkii Soomaaliyeed. Dhibaatooyinka uu ka tegeyna waxaan ka xusi karnaa kuwa soo socda: qofnimadii Soomaaliga oo luntay, xumaanteenii oo debedda u soo baxday, afkeenii hooyo oo lumay, dhaqankeenii oo burburay, xumaantii oo ku faaftay dhexdeena, qiyamkii wanaagsanaa oo lumay.

Si haddaba loo dabaqabto hambadda, waxay anniga ila noqotay inaan giraanta dib u celino oo wax kasta asalkoodii ka soo bilowno, taas oo macnaheedu yahay si loo badbaadiyo qofnimada Soomaaliga, waa in la helaa laba asaas oo kala ah: « **Af iyo Dhaqan**»; waayo waxaa qofnimada (identity) dadka lagu dirsoocaa Afka iyo Dhaqanka. Haddii qofka uu ka lumo afkiisa hooyo iyo dhaqankiisu laguma tiriyo ummaddii uu ka dhashay oo waa dhaqan guurey.

Markii aynu dib ugu laabano dhaqankii hore ee Soomaalida, waxaynu ka heleynaa sidii carruurta loo soo barbaarin jirey, taas oo ka mid ahayd dhaqan bulshadeedka Soomaaliyeed. Iyadoo marba heer soo joogtey, waxaa socodka iyo horumarka dhaqanka isbedelayey muquuninayey marba heerka uu marayey isbedelka dhaqan-dhaqaale ee nolosha miyiga, iyo magaalada. Haddana wuxuu socodka barbaarinta carruurtu ahaa isku mid, oo ilmuhu wuxuu ku barbaari jirey, hadba qoyska uu ka dhashay meheradiisa. haddii uu beeraley yahay ilmuhu wuxu ku barbaari jirey sida beeraha looga shaqeeyo; inta uu aad u yar yahay waxaa loogu heesaa heesaha beeraha. Sidoo kale waxaa kan reer miyiga ah ee xoola dhaqatada ahi ku barbaaraa xoolaha iyo dhaqidooda; marka uu aad u yar yahay waxaa loogu heesaa heesaha miyiga iyo xoolaha ku saabsan, wuxuuna noqdaa mid si gaar ah ugu ababa xoolaha. Carruurta magaaladuna waa sidoo kale. Barbaarinta ilmaha waxay Soomaalidu u kala qaybin jirtey dhowr nooc oo kala ah: Barbaarinta aan tooska ahayn, oo ah marka laga bilaabo kolka hooyadu walacdo ilaa ilmuhu afartanka ka baxayo oo la «gardaadinayo».

Koolkoolinta carruurta waa inta aannu ilmuhu hadal baran ilaa labada sanno oo hore.

Saddexda ilaa lix jirka waxaa ilmaha la baraa maaweelo iyo sidii uu wax u baran lahaa iyo sidii uu shaqo u qaban lahaa. Markii ilmuhu gaaro lix sanno waa inuu qaban karaa wax barasho kasta. Sidaas darteed waxaa lagu bilaabi jirey Qur'aanka, iyo wax kasta oo shaqa ah. Ilmaha waxaa la tusaa oo la baraa sidii uu nolosha u dabikhi lahaa; ilmuhu wuxuu ku tababaran jirey meherada qoyska uu ka dhashay. Barbaarinta aan tooska ahayn waxay timaadaa inta aan ilmuhu dhalan ilaa inta uu ka gaarayo gardaadinta. Gardaadintu waa afartan habeen ee ugu horeeya nolosha adduunka; inta uu uurka hooyadii ku jiro ayaa lagu bilaabi jirey xanaano iyo ka war qabida ilmaha sidii uu uurka hooyadii ugu kori lahaa; waxaa si gaar ah loo ogaan jirey hadba meesha xaalka hooyadu marayo. Walaca oo ah xanuun hooyada qabta kan ugu daran, waxaa la isku dayaa in laga fududeeyo dhibaatadiisa.

Walaca hooyada uurka leh: Markii hooyada uurka lihi bilo yar gaarto, waxaa ku dhaca xanuun la yiraahdo «walac». Walaca waxaa lagu gartaa in hooyadu qandhooto, matag, iyo cunto jamasho. Walacu wuxuu ina tusinayaa in ilmaha uurka ku jira xanaano u baahan yahay. Hooyada waxaa loo diyaariyaa hadba walaxda ay jeclaysato ee jamato. Soomaalidu waxay yiraahdaan waxyaabaha ay hooyada aad u jeclaysato, waa wax ilmuhu u baahan yahay; sidaas darteed waa in loogu dadaalaa sidii la siin lahaa. Soomaalidu waxay ku maahmaahaan: **Walac yuu ku xoola tirin, janna yuu ku ilma tirin**. Waxaa kale oo la sheegaa in haddii haweentu tiraahdo hilib ayaan rabaa oo ninku neef geel ah hayo, waa u qalaa hadii uu wax ka yar waayo.

Kur ama madax shub: Marka hooyada uurkeedu gaaro sideed ilaa sagaal bilood oo ay soo sid dhowayso, waa loo duceeyaa. Sidaas darteed waxay isugu yeertaa haweenka degmada meesha taal, siiba waxay u yeerataa kuwa Qur'aanka yaqaan. Maalintaas waxay bixisaa bun iyo salool, ama xoolo ayey qashaa; haweenka waxay ugu shubtaa cadaro udgoon iyo barafuuno, markaa waxay ugu duceeyaan inaan Allah foosha ku dhibin oo ilma fiican siiyo.

Fulaaliso: Markii haweenta uurka leh ay fool bilado, waxaa loo yeeraa wadaad u akhriya Qur'aan fulaaliso la yiraahdo. Wadaadku wuxuu Allah uga baryaa inuu foosha u sahlo, ilmahana si habboon u dhasho.

Umuliso (Sacabsato): Umulisadu waa haweenayda aqoonta u leh sida dumarka looga fooliyo. Aqoonteeda ka sokow waa in umulisadu lagu xushaa dabci wanaagsan oo ay dheer tahay haweenka kale; sidaas darteed waa loo diidaa in haween kastaa umuliso noqoto. Ujeedada ka dambaysa in umulisada beegaal adag lagu xiro, waxay tahay in ilmaha ay sacabsato dabcigeeda raacayo. Sidaas awgeed ilmaha umuliso dabci wanaagsan sacabsato, wuxuu noqdaa ilmo dabci wanaagsan. Ilmaha ay umuliso xumi sacabsatana wuxuu noqdaa ilmo dabci xun. Soomaaliduna waxay ku maahmaahdaa: «Sacabsi sinji ka adag».

Aadaan: Markii ilmuhu dhasho waxa ugu horeysa oo la maqashiiyaa waa magaca Allah; ilmaha waxaa looga aadaamaa dhegaha, markaa waxaa la yiraahdaa ilmuhu wixii ugu horeeyey ee uu maqlay waxay ahayd magaca Allah.

Innaa-Ansal: Marka ugu horeeya waxaa ilmaha lagu akhriyaa Qur'aan. Gaar ahaan waxaa lagu akhriyaa suurada Innaa-Ansal. Sidoo kale waxaa «cashar diini ah» loogu tufaa in yar oo caano ama biyo ah. Walaxda ugu horeysa ee ilmuhu dhadhamiyo waa in ay ku jirtaa magaca Allah, sidaas baa Soomaalidu rumaysan yihiin in ilmaha iimaanku ku gelayo; ilmahaasuna wuxuu noqonayaa mid wax walba iimaansada.

Balaysin: Balaysinka waxaa la yiraahdaa qofka ugu horeeya ee guriga yimaada, isagoo aan ogayn markii ihmuhu dhashay, marka laga reebo intii awal joogtey, qofkaas waxaa la yiraahdaa soo «baleeye». Soomaaliduna waxay sheegaan in ilmuhu qofkaas dabeecadiisa meel ka shaabihidoona. Qofka xun waa laga qariyaa in ilmo dhashay; Soomaaliduna waxay ku maahmaahaan «balaysin bir ka adag».

Sabaanyo. Markii wiil dhasho waxaa iman jirey nin la yiraahdo Yibir. Erayga Yibir waxay Soomaalidu ku qeexaan bela xijaab. Yibirku wuxuu wiilka dhasha u gooyaa wax yar oo sida qardhaasta oo kale loo habeeyey; qardhaastaas yar waxaa lugu magacaabaa «Makaraamo», oo micnaheedu yahay belo ku kari meyso. Yibirka waxaa la siiyaa xoolo nool ama lacag. Dadka qaarkood waxay aaminsan yihiin in haddii aan Yibirka laga farxin in ilmuhu noqonayo mid doqon doqon ah, oo waxay yiraahdaan Yibir ayaa qaaday. Yibirku wuxuu yiraahdaa haddaan ilmaha wax la iga siin «Xanfaraley» (Xanfaley) baa qaadeysa. Sidaas darteed dadka qaarkood wax bay iska siiyaan iyagoo ula jeeda sadaqo iyo kheyr; kuwana waxay u siiyaan inay caadadooda sii wadaan, waxay Soomaalidu tiraahdaa «Caada la gooyaa cara Allah ayey leedahay»; kuwa kalena waxay qabaan in Yibirku qaadanayo magtii awoowihii oo Soomaalidu dishey. Soomaalidu waxay soo weriyeen in beri Soomaalidu dishey nin la oran jirey «Bucuur Bacayr». Bucuur Bacayr wuxuu ahaa odaygii dhalay Yibraha. Markaa waxaa Yibrihii lagu yiri mag (diyo) qaata, ama wiilkii kasta ee dhasha waxaad ka qaadataan sabaanyo. Sidaas darteed waxaa loo xukumay inay sabaanyo ka qaataan wiil kasta ee dhasha.

Waqlal/Walqal: Ilmaha waa laga waqlalaa oo waxaa isugu yimaada marti badan. Ninka ilmuhu u dhashay waxaa la weydiistaa in uu neef buuran ka waqlalo ilmaha wiilka ah; haddii neefku xoolihiisa ku jiro wuu qalaa ama wuu soo gadaa haddii uu reer magaal yahay. Isla maalintaas ayaa la cunaa neefka. Neefka hilibkiisa goortii la cuno, lafahiisa lama jebiyo oo waxa la yiraahdaa haddii lafta la jebiyo ilmuhu wuxuu noqonayaa mid jabid badan oo lafa jilicsan oo markii wax ku dhacaanba iska jaba.

Wadnaha neefka waqlasha ah lama kariyo, oo waxa la yiraahdaa haddii wadnihiisa la kariyo wuxuu ilmuhu noqonayaa mid fuley ah. Carruurta waxa lagu habaaraa « Wadnahaaga la kari». Wadnaha inta la dubo ayaa la siiyaa ninka ragga ugu fiican, lamana ogola in la calaliyo, ugu badnaan inta laba jeex laga dhigo ayaa ninku laqaa/liqaa. Haweenka looma ogola in ay cunaan wadnaha neefka waqlasha ah, meelaha qaarkood waxaa wadnaha waqlasha afka loogu ridaa awr geel ah, oo waxaa la diidaa in la dubo ama la kariyoba.

Markii ilmaha laga waqlalo waxaa loo bixiyaa magac; magaca waxaa u bixiya Aabaha ilmaha dhalay. Hooyaduna waxay ku dartaa magac kool ah, labada magac midkood ayaa hanaqaada.

Gardaadin: Markii wiilku gaaro afartan maalmood, waxaa la yiraahdaa afartan bax, maalintaas waxaa la yiraahdaa maalinta bannaan bixinta. Afartankaas maalmood lama ogola in umusha iyo ilmaha aqalka laga soo saaro. Maalinta afartan baxa waxaa isugu yimaada koox rag ah, markiiba waxay hooyada ilmaha dhashay u soo saartaa debeda. Ilmaha waxaa loo dhiibaa ninka ragaas laga dooro, haddii farda joogaan wuxuu ku qaadaa faras oo ilmaha la saaraa. Dadka qaar baa qaba in qofka ilmaha gardaadiya dabcigiisu meel ka raacayo ilmaha uu gardaadiyey. Ammintaas wixii ka dambeeya ilmaha waa la xanbaari karaa, oo waxaa la yiraahdaa waa la feda bixiyey. Afartanka wixii ka horeeya waa murjux, oo waxay yiraahdaan weli dhiig kuma duulin.

Xudun Xir: Marka ilmaha xuduntu ka go'do waxa loogu xiraa wax hanti ah, nooc kasta ha noqotee waxaa ilmaha loo hibeeyaa hanti ku magacaaban. Reer miyigu waxay ku xiraan neef geel ah, ama neef ari ah, ama neef lo' ah, neefkaas ilmuhu ayaa iska leh. Neefka xudun-xirka ah waxaa lagu ogaadaa nasiibka ilmahaas. Reer magaalku haddii ay ilmaha siinayaan qol, waxaa xudunta loogu aasaa qolka la siiyey dhexdiisa. Hantidaas waxaa iska leh ilmahaas la siiyey oo dhaxal ma gasho, in isaga dhinto mooyee.

Sida badan waxaa gabdhaha la siiyaa wax magac ah sida dahab, ama shey qiima leh oo ay waa dame u aayaan, reer miyiguna waxay siiyaan ari. .Intasas waxaa la isku yiraahdaa barbaarinta carruurta ee aan tooska ahayn. Barbaarintaasi waxay isugu jirtaa kuwa Diinta Islaamku ogoshahay, iyo kuwa dhaqanka keliyi jidaystey. Intaas wixii ka dambeeya wuxuu ilmuhu u gudbayaa hees kool-koolineeda carruurta, oo ah marxalada labaad ee ilmaha. Marxalada labaad ee ilmuhu waa barbaarinta tooska ah, sidaas darteed lama ogola in ilmaha la maqashiiyo eray xun oo marin habaabinaya. Waxaa soo diyaariyey Khaalid Cali Warsame Denmark, la soco cadadka dambe.

D A C A A Y A D

Maansada Sirta Noloshu waxay ku hal-qabsanaysaa saaxiibkiis Rashiid iyo Sahra Rashiid Sh. Cabdullaahi oo u taagan hablaha Soomaalida ama hablaha adduunka. Maan-sadu waxay isha marindoontaa beyded ibo-fur u ah nolosha adduunyada iyo sida loogu baa-han yahay in shakhsigu garto dantiisa. Maan-sadu waxay qofka tusaysaa hadduu waayo wuxuu doonayo inuu qaato wuxuu dantiisa ku gaadhayo. Maxammad Ibraahiim Hadraawi wuxuu yidhi

Saaxiibkayow heedhe
Safar baan ka imi dheere
Marka hore salaam diiran
Marka xiga samow heedhe
Ha ka nixin si dalagtayda
Sacab fara madhnaantayda
Suugaanta yaabkeeda
Salka iyo fadhaa keena
Marka xiga sugnaanteeda
Socodkiyo falkaa sheega
xeerkeedu waa saase

Saaxiibkayow heedhe
Anba saaka qaybteeda
Sirsiraan ka joogaaye
Xadhigiyo bal eeg suunka
Iyo sabarka gaadiidey
Iyo salabka ii qaaran
Iyo suudha guudkayga
Hilaygiyo waxaan saabka
U gilgiley samow haanta
Subag inay ku dhiiqdaaye
Saasay ku badisaaye
Sannad waliba xeeshiiye
Kol hadday silloonaato
Samaheedu waa dhiige .
Sumuc talada loo dhiibye
Sida sida sidaas weeye
Si la yeeli jirey weeye.

Hadraawi wuxuu saaxiibkiis Rashiid u gudbi-nayaa salaam diiran, ka bacdina wuxuu u dul marayaa adduunka iyo waxa belaayo iyo qaxar (dil iyo dhiig) hareerihiisa ka:a taagan, waxa aloosan iyo waxa ka soo guuxaya ee dunidu manta ka taagan (gaar ahaan soomaaliya). Intaas ka dib wuxuu abwaanku u gudbayaa Sahra Rashiid oo uu farayo ku fara adayga samaha iyo anshaxa wanaagsan, isagoo ku dhaadanaya in aabbaheed Rashiid macalim ugu yahay Hadraawi samaha iyo u hiilintiisa, iyadana wuxuu ka rabaa inay dhax-alkaas sii gudbiso oo wuu la dardaarmayaa.

Marka xiga samow heedhe
Talo sibiq dhaqaaqeeda
Soof-daran habowgeeda
Sal-fudaydka hoogiisa
Bal sallaankan fuul laalan
Iyo sagabtan heensaysan
Dhulka saas u jeedaali
Sidan iyo sidaas fiiri
Sidan iyo gadaal dheeho
Raqda solan lafaa soogan
Bal su'aal u celi meydkan
Sababtuu u go'ay raadi!
Bal dhegayso saylaanka
Iyo salowga beer-qaadka
Iyo sebiga yeedhiisa
Waxaad aragtayoo saasa
Waxad maqashay oo saasa
Maxaad odhan lahayd Suudi?
Samalaho furfuriddooda
Godka seerma weydaanka
Marka ay sabbuux gaadho
Si kalaan u dhigi taase
Saaxiibkay Waa yaale
Suurtuu dhalaay heedhe

Heedhee Sahraay heedhe
Waxaan adiga kuu saantay
Dadka kaaga soo soocay "
Sahra kuugu yeedh-yeedhay
Siduu aabbahaa heedhe
Samo ii faraan heedhe
Kuu siinayaa heedhe
Sooyaalka taariikhdu
Iyadaan sal-guurayne
Murtidaan Sahraay heedhe
Sadar kuugu qorayaaye,
Heedhee Sahraay heedhe
Curad suubbaneey heedhe
Sumaddii Rashiid yeelo
Iyo weynidii Saado
Iyo sawricii hooyo
Sinjigii hablaha geeska

Sadarada soo socda waxay xambaarsan yihiin murti iyo hogatusaalayn baaxad leh, isla markaana waxay ka xog-waramayaan in qofka aadamigu ka fadilan yahay khalqiga kale. Aadamiga waxaa la siiyey garasho, taasoo loo tilmaamayo in laga doonayo dhaqan wanaagsan oo ay hor kacayso garasho, xishood iyo xadhko ku xakameeya, si aan qofku u samayn wax kasta ama wuxuu doono.

Garashadu Sahraay ruuxa
Sed u gaara weeyaane
Hadduu saamigaas yeeshay
Qurux ma leh saluugeedu
Dadku siigga dida maaha.
Sogob iyo ri'weyn maaha
Sumal iyo laxdiis maaha
Rati iyo sabeen maaha
Falka iyo sugnaantiisa
Socodkiyo abbaaartiisa
Dhaqan sida xishoodkiisa
Dabar iyo silsilad haysa

Iyo suun ma dhaafaan ah
Wuxuu soofka xoolaaba
Kaga soocan yahay weeye
Waxan uga socdaa heedhe
Naftu seeto yey waayin
Hana falin sidaad doonto

Beydadka soo socda wuxuu bayaaminayaa inay lagama maarmaan tahay geeddi gelinta hadalka iyo wadaaga dooduhu inay raacaan tub sharci ah oo la waafajiyo jidkaas. Looma baahna hadal qaawan oo aradan, mana habboona hadal xidh-xidhan oo aan la fahmi karin, laguma dheeraado sii wadistiisa, lagamana tago nuxurkiisa iyo badheedhi-hiisa, isla markaana waxaa laga ilaaliyaa in wadaag-giisa la suul daaro iyo in lagu hadlo wax qadaf iyo qallooc keeni kara.

Hadalkana sar weedhiisa
Una saaf qofkii waaya
Ha ka tegin sarbeebtiisa
Hana gelin sursuur oodan
Hana lumen sargoyntiisa
Hana liqin sangaabtiisa
Ha ku saxan badheedhkiisa
Runta sogordoh haw yeelin
Ha suldaarin dooddiisa
Sisi baa wadaagiisa
Sababee abbaartaada
Hana badin su'aashiisa
Sarifkiyo tilmaantiisa
Saddex eray halkii dooni
sondon yaanay kaa qaadan
Sidi-qabaxi yay raacin
Sare haw dhig-dhigin luuqda
Gacantana ha saydh-saydhin
Hana odhan wax sawliila
La soco sirta nolosha iyo cadadka dambe. Sheekada sirta nolosha waxaad ka faa'iidaysaa xigmada nolosha loo baahan yahay in lagu socdo.

Taariikh Nololeedkii Hadraawi

Haddana aan eegno taariikh nololeedkii Max-ammad Ibrahim Warsame—Hadraawi.

Maxammad Ibrahim Warsame—Hadraawi waa maansoole ka mid ah hal-abuurayaasha ugu waaweyn, uguna magaca dheer suugaanya-hanada soomaaliyeed ee casrigan. Waa hal-door aqoon-yahan ah oo ku fogaadey, isla markaana ku talax-tegey oo ku dhex xasilay cilmiga bulshada. Hadraawi wuxuu ku xeel dheer yahay oo uu halkooda ugu tegey awaale -waranka iyo hoga-tuska maanseed ee dhaqan ilaalinta, hidde madhxinta iyo xaqii-jinta suugaanta iyo murtida Soomaaliyeed.

Maxamed Ibraahim Hadraawi wuxuu qiyaastii dhashay 1943dii. Hadraawi wuxuu ku dha-shay miyiga degaanka gobolka Togdheer. Aab-bihii Ibraahim Warsame Siciid oo Walanwal loo yaqaaney, ayaa Allah ha u naxariistee ahaa nin laftiisu wax ka yaqaan curinta maan-sada Soomaalida, gaar ahaan Afarreyda. Ibraahim Walanwal wuxuu geeriyoodey san-nadkii 1983dii. Hadraawi hooyadii waxaa la odhan jirey Kaaha Jaamac Buux iyaduna waxay geeriyootey naxariistii jano Allah ha siiyee Maxamed oo qiyaastii 7-8 sano jir ah. Hadraawi waxa la dhashay oo ay walaalo ahaayeen toddoba wiil iyo gabadh keliya, waxaana maanta ka nool saddex ka mid ah.

Ragga ay Hadraawi walaalaha yihiin ee maanta nool waxa ka mid ah Hurre Walanwal oo isaga laftiisu ah hal-abuur maansayahan ah, caana ku ah oo aad looga yaqaan go-layaasha iyo fagaaraha hees cayaareedyada Soomaalida.

Hadraawi waxaa adeer u ahaa Axmed War-same Siciid (Niibsan) oo ka mid ahaa Ciidamada Booliska Ingiriiska ee magaalada Cadan. Horraantii 1950-nadii ayaa Hadraawi miyiga laga ka xeeyey oo la keenay magaal-ada Cadan ee Dalka Yemen. Hadraawi waxaa magaalada Cadan loogu geeyey aayooyinkii: Caasha Maxamed Xasan iyo Shamis Xasan Nuur-Qaaje oo halkii Hooyadii u galay. 1954tii ayaa Maxamed Ibraahim magaalada Cadan ka bilaabay Malcaamad Qur'aanka lagu barto. 1956-kiina wuxuu Cadan ka bilaabay waxba-rashada dugsiga caadiga ah. Waxbarashada dugsiga sare wuxuu dhammaystay 1964tii. Isagoo ka baxay dugsi magaciisa la odhan jirey St. Anthony's High School ee magaalada Cadan.

Hadraawi wuxuu yidhi: Waxaa yaab weyn igu ahaa markii aan tuulooyinka ka soo gudbey ee aan magaalo soo galay. Berbera ayaa iigu horreysey magaalo weyn, waxaa fajac iyo wareer igu ahaa in aan bad arko. Markii aan Berbera ku soo socdey, waxaan soo maray dhulka ka rogan buuraleyda ee xeebaha ku foorora. Dhulkaasi wuxuu ahaa abaar aan dhir lahayn, caws lahay, waxba lahayn oo kax ah. Taas oo ka duwan dhulkii aan ka imi oo markaas ahaa dhul hodan ah oo wada dhir iyo ugbaad ah. Markii aan u dhaadhacay dhinacii xeebta ayaa waxaan arkay baddii. Hore waan u maqlay magaca bad, hase yeeshee ma arag, mana sawiri karayn, waxaan muuqii badda u qaatay inuu yahay banaan doog leh iyo dhul barwaaqo ah! Waxana igu soo dhacday oo aan is weydiiyey sababta xoolihii joogey dhul-kaas abaarta ahaa ee aanu marayney ay ugu daaq tegi waayeen hirarkaas doogga ah ee u muuqda.

Runtii arrintaas baddu waa iga wareerisey, markaan ku si dhowaadeyna waxaan aqoon-saday in meesha waxa fadhiyaa aanay baad ahayn ee biyo yihiin. La soco cadadka dambe.

BARO DALKAAGA HOOYO - SOOMAALIYA

Barashada Diinta Islaamka

Islaamku waa dariiq nololeed oo dhammaystiran. Islaamku waa hoggaamin Alláh (sw) siiyey khalqigiisa, Alláhaas oo abuuray Aadamaha iyo caalamka ku wareegsan oo idil. Islaamku wuxuu inoo sheegaa ujeedada Alláh (sw) ka lahaa abuurista Aadamaha, aayaheena dambe, iyo derejada Aadamuhu ku leeyahay khalgigiisa. Islaamku wuxuu ina tusiyaa sida ugu fiican ee aynu u fulinayno arrimaha qof kasta u gaarka ah, arrimaha bulshada, arrimaha siyaasada, arrimaha dhaqaalaha, arrimaha anshaxa (moral affairs), iyo arrimaha cibaadada.

Erayga Islaam waa eray Carabi ah oo macnahiisu yahay «hoggaansan iyo adeecid». Hoggaansanku waa iyada oo la raaco (la qabatimo) Alláh (sw) amaradiisa. Adeecuduna waa in la dabakho (sameeyo) Alláh (sw) amaradiisa. Sidaas darteed amarada Alláh (sw) oo la qabatimo iyo dabakhaadoodu waxay keentaa «nabad». Taasina waa sababta Islaamku ula macno yahay «nabad», waayo waxay raacista iyo dabakhaada ammarada Alláh (sw) keenaysaa nabadgelyo. Qofka raaca dariiqa suubban ee Islaamka, waxaa loogu yeedhaa «Muslim».

Islaamku waa dawga nabadgelyada iyo kala amar qaadashada. Haddii aynu fiirino hareeraheena, waxaynu arkaynaa in walax kasta ku soconayso amar Alláh (sw) siiyey. Haddii aynu u fiirsano qoraxda, dayaxa, xiddigaha, badaha, iwm waxaynu dareemi karnaa in walax kasta ku soconayso qaanuun Alláh (sw) u dejiyey. Weligeed lama arag oo lama maqal qorax baa dayax jiidhtay, ama dayax baa qorax jiidhay; taasi waxay ina tusinaysaa in maamulka kownka (universe) aanu ka jirin wax amardiido ah. Qawaaniinta Alláh (sw) waxaa lagu yaqaan inaanay isbedelin; tusaale ahaan, qoraxdu waxay ka soo baxdaa bari, isla markaana waxay ka dhacdaa galbeed (bogox), dayaxa iyo xiddiguhu waxay soo baxaan habeenkii, marka maalintu tagtana waxaa yimaada habeen, ubaxa iyo caleemuhu waxay dhirta ka soo baxaan xilliga gu'ga, iyo dayrta.

Walax kasta waxay ku soconaysaa qaanuun loo dejiyey, mana jebin karto. Weli miyaa la arkay qaanuun Alláh (sw) oo ay jebiyeen walxaha dhalanku (objects of nature)?, jawaabtu waa maya. Waayo? walxaha dhalanka waxaa loo abuuray inay Alláh (sw) adeecaan, isla markaana ma haystaan doorasho ay ku jebiyaan. Taasina waa sababta walxaha dhalanka looga helay nabad waarta (eternal peace). Walxaha dhalanka ee inaka sareeya, waxaa kale oo loogu yeedhi karaa «Caalamka Cadceeda». Laakiin, Aadamuhu waa ka duwan yahay walxaha dhalanka. Alláh (sw) wuxuu Aadamaha siiyey «aqoon iyo doorasho» ay ku gartaan oo ku doortaan saxa (jidka toosan) iyo khaladka (jidka khaldan). Alláh (sw) cidla kagama tegin Aadamaha, laakiin wuxuu u soo diray rusul iyo kutub tusiya jidka toosan, si ay qofka u hagaan.

Alláh (sw) kuma dirqiyin Aadamaha inay khasab ku adeecaan. Laakiin Alláh (sw) wuxuu Aadamaha siiyey doorasho inay adeecaan ama diidaan. Waayo maxaa Aadamaha loo siiyey doorasho?, Alláh (sw) wuxuu rabaa inuu imtixaano adoomihiisa. Imtixaanka ka bacdi waxaa jiridoonta maalin adoomaha la kala xukumidoono. Qofkii imtixaanka ku gudba, wuxuu Alláh (sw) ku abaalmarinayaa nabad iyo degganaan waarta oo «Janno» ah; qofkii imtixaanka ku dhacana, wuxuu la kulmidoonaa ciqaab xun, hoog iyo haydaarto oo «Naar» ah. Dadku waxay abaalmarinta wanaagsan ku xoogsan karaan, isla markaana ay ciqaabta Alláh (sw) kaga baxsan karaan, iyagoo Alláh (sw) adeeca oo caabuda.

Waxaan hore u soo sheegnay in walxaha dhalanka (objects of nature) ay ka dhex jirto nabad waarta, iyo amar qaadasho u socota sidii Alláh (sw) u qorsheeyey; waayo ma haystaan doorasho ay Alláh (sw) amarkiisa ku diidaan. Sidaas darteed haddii dadku raacaan jidka sharciga ah ee Nebiyada iyo Rususha lagu soo dejiyey, waxaa dhab ah in dunida guudkeeda loogu wada noolaan lahaa nabadgelyo iyo dulmi la'aan.

Aadamaha oo idil waxaa dabeecadiisa ku beeran inuu jecel yahay shayga fiican, isla markaana uu neceb yahay shayga xun. Tusaale ahaan, dadku waxay jecel yihiin runta, isla markaana waxay neceb yihiin beenta. Haddii qofku beenaale yahay ma jecla in lagu sheego beenaale; waayo waa tilmaan xun. Sidoo kale u gargaarista dadka, u naxariisashada dadka, ixtiraamka dadka waaweyn, adeecida waalidka, qaadashada amarka macalimka, daacadnimada, iyo akhlaaqda wanaagsan oo dhammi, waxay agteena ku leeyihiin qiimo weyn oo aynu jecelnahay. Laakiin xumaanta, cadawnimada, been sheega, dhibista dadka kale, caasinimada waalidka iyo macalimiinta, magacyada xun, iyo akhlaaqda xun oo dhammi, waynu neceb nahay oo agteena qiimayn kuma leh. Sidaas darteed waxaa dabeecada Aadamaha ku beeran wanaag jeceylka iyo xumaan neceybka. Wanaaga waxaa afka carabiga loo yaqaan «Macruuf». Xumahana waxaa loo yaqaan «Munkar».

Aadamaha dabeecadiisa waxaa kale oo ku beeran nabad jeceylka, iyo amar kala qaadashada. Dadku waxay neceb yihiin amar diidada, iyo is maqal la'aanta. Nabadu waa midhaha ka soo go'a Alláh (sw) amaradiisa oo loo hoggaansamo. Nabadgelyo la'aantuna waa midhaha ka soo go'a Alláh (sw) amaradiisa oo la diido. Sidaas darteed wuxuu Islaamku unkaa nabad jeceylka ku beeran dabeecada Aadamaha. Islaamku waa «diin dhalan» (diinul fitrah) oo qofka ilhaamisa, waxa dabeecadiisa ku beeran.

Si bulshooyinka dunidu u gaadhaan nabad waarta, wuxuu Islaamku farayaa in laga wada shaqeeyo wanaaga, isla markaana la fogeeyo shaydaanka iyo dhashiisa. Shaydaanka oo lagaga hortago cudud middaysan, waxaa la yiraahdaa «Jihaad». Ujeeddada Jihaadku waxay tahay in runta la sugo oo dhidibada loo aaso, iyo in beenta la libdhiyo. Jihaadka waxaa lagu gaadhaa derejada ugu saraysa ee Jannada.

Marka gaaladu rabaan inay Diinta Islaamka wax ka sheegaan, waxay yidhaahdaa «Diintii Muxammad» (Mohammedanism). Dadka muslimiinta ahna waxay ugu yeedhaan «Muxammadiyiintii» (Mohammedans). Ujeeddada ka dambaysaana waxay tahay inay Diinta Islaamka duraan, si Diinta Islaamku ugu muuqato wax Nebi Muxammad (scw) la yimi; sida diinaha kale loogu magac daray ninkii asaasay. Tusaale ahaan, waxaa Diinta Masiixiga loogu magac daray Ciise Masiix, Diinta Budhiisamka waxaa loogu magac daray ninkii asaasay ee Budha. Laakiin Islaamka laguma magacaabi karo Nebi Muxammad (scw). Erayga Islaam waa eray loo yiqiinay diinihii hore oo dhan, laga soo bilaabo diintii Nebi Aadam illaa Nebi Muxammad.

Qur'aanku wuxuu isticmaalaa erayada Islaam iyo Muslim. Diinta Islaamku waa diinta qudha ee laga aqbalayo qofka la yimaada Maalinta Qiyaamaha. Alláh (sw) ayaa dadka raaca jidkiisa hore ugu magacaabay «Muslimiin».

Dab Dhaxamooday Maxaa Lagu Daaweeyaa?

tahay maanta waxay haystaan hal fursad oo ay bulshada ku badbaadin karaan; taasina waxay tahay iyagoo midooba dadkana talada wax ka siiya, isla markaana waca shirweyne loo dhan yahay, dabadeedna talo midaysan soo saara. Dhibta ugu badan ee ay bulshada ku hayaan waxaa ka mid ah iyagoo labada maamul mid kasta siiya saxeexooda, arrintaasina waxay jaah wareerisay bulshadii oo dhan. Isimada waxay ahayd inay talo ka yeeshaan wax kasta dantooda wada ilaashadaan, sharaftooda dhawrtaan, dadka jiheeyaan; laakiin maxay tahay ceebta ka weyn in isimadu la kala socdaan maamulada. Isimada waxay ahayd in iyaga la dabogalo, laakiin maaha inay iyagu cid dabagalaan. Dalkaba idinkaa lehe u taliya. Diyaariye: Cismaan M. Faarax– Suxufi.

OGEYSIIS

Dhamaan dadweynaha reer Lascanod waxaa la ogaysiinayaa in Dugsiga Hoose Dhexe ee IMAAMUL SHAAFICI PRIMARY SCHOOL dib loo furay 03/11/2007. Waalidiintu waa inay carruurta iskuulka ku soo celiyaan.

Bogga Murtida iyo Suugaanta ee Sool, Sanaag iyo Cayn

Afka Soomaalidu waa af ballaadhan, erayadiisuna badan yihiin, dhan loo eegaba hadal iyo hawraar, maanso iyo maahmaah, gabay iyo geeraar, masafo iyo madadaalo, hees iyo heello, sheeko iyo shaxariir, qorriin iyo qun-u-hadal; gees loo dayaba waa af hodan ah, murti iyo macaan ka buuxaan, qoto dheeri iyo qaayana Eebbe weyne u yeelay. Dadka ku hadlaana ku kalsoon yihiin oo dantooda iyo waxa ay doonayaanna ku sheegan karaan. Eray walba oo erayadiisa ka mid ahi wuxuu leeyahay dhowr eray oo la mid ah ama la macno ah. Eray walba waxaa ka abuurma dhowr eray oo kale. Afka Soomaaligu wuxuu ka mid yahay afafka geeska Afrika lagaga hadlo, welina run ahaan looma oga afafka uu la bah yahay. Nimanka afafka badhaa waxay sheegaan in afka Soomaaligu ka mid yahay afafka reer xaam gaar ahaan «Kuush». Xiriir dheerna wuxuu la leeyahay afka Gaallaha.

In kasta oo aan afsoomaaliga si dhab ah loo baadhin lama oga taariikhdii maansada la bilaabay gaar ahaan gabayga, oday ma sheegin, wiilna aabihiis kama werin. Haddaba ninkii yidhaahda waagaas baa gabayga la bilaabay ama nin hebel baa bilaabay ama ugu horreeyey been buu sheegay. Haddaynu dhab ugu fiirsanno waxaa hubaal ah in dhismaha guud ee hadalka ama xeerka maansada loo mariyo ama habka iyo hannaanka gabaygu u dhisan yahay iyo sida qof waliba u yaqaan waddada loo maro ama sida deelqaafka iyo laaxinka looga illaaliyo waxaad garan kartaa inuu fil weyn yahay oo taariikh dheer soo maray.

Guud ahaan afsoomaaligu wuxuu u kala baxaa hadal iyo murti. Hadalku waa dhawaaq iskudhisan oo macno faa'iido leh sameeya. Halkaas waxaan ka fahmaynaa inaan dhawaaq kasta la odhan karin hadal sida: Cida xoolaha, dhawaaqa durbaanka iyo sacabka dadka. Sidoo kale waxaa hadal lagu qeexi karaa inuu yahay erayada qayaxan ee aan taxnayn, jiib iyo luuq midna aan lahayn, warkana laysugu tebiyo. Murtidu waa erayo taxan oo jiib iyo luuq leh, deelqaaf iyo laaxinna aan lahayn, warkana laysugu tebiyo. Murtidu waxay u kala baxdaa maanso iyo hees. Heesku wuxuu u kala baxaa laba qaybood: Hees hawleed iyo hees cayaareed. Hees hawleed waa heeska hawsha lagu qabto, hawshaasi ha ahaato hawl xoolaad ama ha ahaato hawl farsamo. Hees cayaareedna waa heeskii sacabka ama jaanta loo tumo ama durbaan loo garaaco oo looga jeedo farax, maaweelo iyo madaddaalo iyo wixii la mid ah. Labadaas qaybood oo aanu soo sheegnay haddii la falanqeeyo mid waliba wuxuu noqonayaa bad aan xeeb lahayn, berri aan laga hoyan karin, iyo biyo aan laga bixi karin.

Ujeedadaydu ma aha inaan heesaha halkan kaga sheekeeyo, hase yeeshee waxay dulucdaydu u dhacaysaa qaybaha maansada iyo wixii la xidhiidha. Haddaynu u dhabbagalno waxay maansadu u kala baxdaa toddoba qaybood oo kala duwan: Gabay, geeraar, masafo, jiifto, weglo, guurow, iyo buraanbur. Toddobadaas qaybood oo maansadu u kala baxdo waxaa calanka u sida gabayga. Siday isugu xigaan bay u kala qiimo weyn yihiin. Soomaalidii hore ninka gabyaaga ah iyo gabayguba qaayo weyn iyo qiimo badan bay la lahaayeen, dadka dhexdiisana xurmo iyo xarragay ku lahaayeen, xulquun iyo xoolana waa u oggolaayeen, maxaa wacay wuxuu gabaygu ka mid ahaa ciidanka iyo gaashaandhigga dadku ku talagalo. Aan ka soo qaadno iyadoo col la duulinayo waxaa lagama maarmaan ahaan jirtey in nin gabyaa ahi colka la socdo. Haddaba, haddii colkaasi soo guulaysto oo geel la helo waxaa ninka gabyaaga ah la siin jirey saami dheeraad ah oo loo yaqaan «hashii gabayga».

Guud ahaan afsoomaaligu murtida iyo macaanka waa ka siman yahay, gabayguna waa ugu horreeyaa, waana ugu hanaqaadsan yahay, waxaana la moodaa inuu kuwa kale ka qiimo weyn yahay. Dadka maansada tiriyaa, gaar ahaan gabayga waa kala hadalla waaweyn yihiin ama hilinka maansada iyo hogta gabayga waa kala heli ogyihiin, danta iyo ujeedadana waa kala abbaari ogyihiin. La arkee nin gabyaa ahi inuu meel ku fiican yahay meelna ku liito, meelahaas oo ay ka mid yihiin kuwa kani: Ammaanta, cayda, faanka, digashada, diradiraha, calaacalka, guubaabada, waanada, kuhaanka (guhaanka), iyo xikmadda.

Horay waxaan ku soo sheegay in maansadu u kala baxdo toddoba qaybood. Haddaba ha u malayn inay intaas ku kooban tahay. La arkee inay jiraan kuwo aanan aqoon ama aanan maqal. Sheeko waxa aanan ku maqal shaahidna aanan ku arag nin toddobadaas qaybood ee aan horay u soo sheegay ku wada maansooday. Sayid Muxammad baa ugu dhowaa oo wuxuu yiqiin shanta u horreysa. Mid kasta oo ka mid ah toddobada qaybood ee maansada waxaa laga helayaa Diiwaanka Gabayada wegloda maahee, laakiin waxay ku filiqsan yihiin buugga dhexdiisa. Halkaas waxaa laga garanayaa in Sayid Muxammad ahaa nin aqoon dheer iyo aftahamo Eebbe hibo u siiyey. Sidoo kale wuxuu hanaqaad ku ahaa hilin kasta oo hilimada maansada loo qaado ama ay ka ambabaxdo sida: Guubaabada, ammaanta, cayda, calaacalka, faanka digashada, diradiraha, iyo xigmadda. Ciidamadii daraawiishta ee Sayid Muxammad abbaanduulaha u ahaa waxay gariiriyeen geyiga Soomaaliyeed oo idil intii u dhexaysey shan iyo labaatankii gu' ee 1896 illaa 1922kii; sida xaqiiqdu tahay waxaa la odhan karaa waxyaalihii isu keenay ee kiciyey ama isku dubbaridey waxaa ugu weynaa maansadii gabbal dhacay iyo waa beryaba la marinayey. Haddaba waxaa is weydiin leh: Sayidku ma cid buu ka dhaxlay ama ka hidda raacay aftahamada ballaaran iyo fasaaxada la yaabka leh? Mise waa hibo Eebbe siiyey? Taas waxaynu oran karnaa: Waa barako Rabbi beerka u geliyey; waayo wuxuu afsoomaaliga kaga fasaaxad badnaa Diinta Islaamka iyo afka carabiga.

Sayid Muxammad wuxuu halganka jihaadka ka bilaabay waxbarid iyo fidinta Diinta Islaamka; arrintaasina waxay geyiga Soomaaliya gelisey dacwo, dhaqdhaqaaq cusub, iyo bulaan. Sayidku wuxuu la jaanqaaday markii Ingiriisku goostay inuu geyiga Soomaaliya gumaysto oo ay taariikhdu ku aaddanayd 1884tii. Ugu horraynna wuxuu Ingiriisku geyiga Soomaaliya u soo diray wadaaddo fidinaya Diinta Masiixiga. Sidaas darteed waxaa Sayid Muxammad u muuqatay in geyiga Soomaaliya la qabsaday oo Diintii Islaamka la xididdo siibey. Sayid Muxammad wuxuu ku tashaday inuu arrintaas ka dagaallamo wixii karaankiisa ah oo tallaabo ka qaado. Sidaas darteed wuxuu bilaabay waano iyo wax isu sheeg si uu dadka u garansiiyo ujeedada uu gumaysigu damacsan yahay iyo waxa uu doonayo.

Markii uu wax is garab taaga ama garawshiinya ah ka waayey dadkii reer magaalka ahaa oo ka dhiidhiya gumaysiga wuxuu goostay inuu u kicitimo dhanka miyiga; waayo waxay dadka Soomaalida ahi boqolkiiba shan iyo sagaashan deggan yihiin miyiga oo itaal, awood, iyo adduunyaba ku leeyihiin. Markay taariikhdu ahayd 1887dii wuxuu Sayid Muxammad oo wata koox wadaaddo ah ka baxay magaalada Berbera, intaas ka bacdina wuxuu shalmadda dhigay ceel la yiraahdo «Qoryaweyn» oo 60 mayl ka xiga dhanka koonfur-bari magaalada Burco. Halkaas wuxuu Sayidku ka abuuray ururkii ugu horeeyey dhiskii daraawiisheed (Xarunta); markii ay laba gu' iyo dayri ka soo wareegtey ka soo bixiddii Berbera wuxuu isku dubbaridey dadkii dhulka degganaa oo dhan. Abaabulka iyo warka Sayidkuna wuxuu ku fiday geyiga Soomaaliya oo idil.

Ingiriisku ma filayn arrintaas oo marna maskaxda kuma hayn, mana malaynayn inuu Sayid Muxammad col ururs ku maqan yahay dad oo dhammina raacay. Warkii wuxuu argagixiso iyo layaab ku noqday gumaysiga Ingiriiska. Ingiriisku wuxuu kale oo la sii yaabay markii ay si dhab u caddaatay abaabulka sayidku wado ama uu damacsan yahay iyo sida uu dad isugu dumay ama isugu dubbaridey dad xaddigaas ah. Ciidamada Daraawiishta waxaa la dagaallamay oo ka soo horjeedey saddex ciidan oo kala ah: **(1) Ciidanka Ingiriiska, (2) Ciidanka Talyaaniga, iyo (3) Ciidanka Xabashida**. Saddexda ciidan ee hore waxay doonayeen inay dalka Soomaaliya qabsadaan. Sidoo kale waxaa Ciidamada Daraawiishta la dagaalamay saddex boqor ciidamadood: (4) Suldaan Cali Yuusuf oo Hobyo u talin jirey, (5) Boqor Cismaan oo u talin jirey gobolka Bari, iyo (6) Garaad Maxmuud Cali Shire oo u talin jirey Degmada Laasqoray. Saddexdaas boqor iyo ciidamadoodu waxay gacan siinayeen gumaysiga si ay u nabadgeliyaan talisyadooda. Daraawiishi waxay ku guulaysatey inay gaashaanka u qabato dhammaan ciidamadaas xagjirka ah, inta badanna waxay libtu raaci jirtey Ciidamada Daraawiishta. Nin kasta oo Soomaaliyeedna wuu og yahay ama wuu maqlay heerkii sare ee Sayid Muxammad iyo Daraawiishi ka gaareen guulihii dagaalka ee ay la galeen gaalo iyo cawaankeeda. Haddaba waxaan taariikh gaaban ka milicsanaynaa Sayid Muxammad Cabdulle Xasan iyo Daraawiishtiisii uu abbaanka u ahaa.

HIKMAD MUHIIM AH

ILAYS EDUCATIONAL ACADEMY waxay soo jeedinaysaa hal eray oo run ah oo haddii la fahmo xal u ah dhibaatooyinka degmadeena haysta, dhibaatooyinka ummadeena haysta, iyo dhibaatooyinka dunida oo idil. Runtaasi waxay ku ururtaan tahay hal kelmad oo keliya. Kelmadaasi waa "**Waxbarasho**".

SOMTEL



Fast Internet. Cheap International Calls. Customer Friendly Staff. In the Centre of the City. Come and visit

SOMTEL waa shirkadihii ugu horeeyey ee wada u jeexay isgaadhsiinta mandaqada SSC. Welina heegan u ah adeega macaamiisheeda iyo casriyeynta qalabkeeda. Dedeji dalabkaaga waxaad la haysaba waad heli.

HANTELECOM

RELIABLE BUSINESS PARTNER

Hantelecom waxay kuu suurtogelinaysaa in caalamka daafihiisa bilaash lagaaga soo waci karo. Ma u sheegtay qaraabadaada iyo saaxiibadaa inay bilaash kuu soo wici karaan. Fadlan gasho Hantelecom rent line si hadda laguu soo waco. Ku xidhan qaraabadaada iyo saaxiibadaa adigoo isticmaalaya HANTELECOM INTERNET CAFES, make chatting and send an email now. Internet waa hooyada cilmiga fadlan isku day inaad ka raadiso mowduuca aad ubaahan tahay. Hantelecom waxay kuu balanqaadaysaa internet dheereeya iyo fariintaada oo gaadha meeshii.

HANWO AND NUGAL TELECOM
HAN TELECOM
TOOS
TSGAARSIINTA HANWO IYO NUGAL

Ku soodhowow HOTEL ATAASH Lascanod oo aad ka helayso jiif raaxo leh, cunto fudud, fadhi wanaagsan, cabitaan kulayl iyo qabow leh. Waxaa halkaas kugu sugaya shaqaale u tababaran hawshooda.